

Ku xilhaayeha xannaanadda/waalidka iyo ilmaha



Folkhälsomyndigheten

Tallaalka cudurka [Covid-19] looga hortago qofka is-tallaalay oo loogu talagalay ilmaha 12 sano jirka ah ama ka wayn

Cudurka [Covid-19] waa cudur aad laysku qaadsiiyo. Is-tallaalista waa habka ugu waxtarka badan ee looga badbaado cudurka.

Ilmaha iyo dadka waawayn cudurka [Covid-19] dartiisa ayay u xannuunsan karaan. Ilmaha badi ahaan aad ugu ma xannuunsadaan, laakin qaar ayaa aad ugu xannuunsadaan ama muddo dheer caafimaadkooda ma wannaagsana. Daawada tallaalka waxay jirka ka caawinta ka badbaadista cudurka. Dhammaan ilmaha buuxsadeen 12 sano waxay iska tallaali karaan cudurka [Covid-19]. Tallaalka waa lacag la`aan.

Fayruuska hab fudud ayuu u faafa

Cudurka [Covid-19] waa lays qaadsiiyaa. Haddii qofka u xanuunsato waa in u guriga iska joogo, waxaa hoos u dhaca halista in u bulshada ku faafo, laakinse suurtagal ma noqon karto in fayruus faafinta gebi ahaan la ciribtiro. Tallaalka waa habka ugu waxtar badan oo Cudurka [Covid-19] looga badbaado.

Tallaalka wuu badbaadiyaa

Daawada tallaalka hab aad u taxadarsan ayaa loo soo tijaabiyay, taasoo ilmaha ka badbaadinayso in hab halis ah ugu xannuunsadaan wayna sugan tahay isticmaalkeeda. Ilmo tiradooda malaayiin ah oo ku nool adduunwaynaha ku nool ayaa cudurka [Covid-19] laga tallaalay.

Mararka qaarkood waxaa dhacdaa in qofka fayruuska la qaadsiiyo, inkastoo haddana cudurka laga tallaalay, laakin marar dhif ah ayay dhacda. Haddii ay dhacdo, badi ahaan qofku si darran ugu ma xannuunsado. Inkastoo qofku u cudurka [Covid-19] iska tallaalay, haddana waxaa muhim ah in qofku u gurigiisa iska joogo haddii u hargab ku dhaco ama u xannuunsado.

Ku saabsan tallaalka

Tallaalka kahor waa inaad ka jawaabto su`aallo ku saabsan xaalad caafimaadeeka ubadkaaga, sid tusaale haddii ubadkaaga u aleerji ku yahay maaddo. Qofka waxaa laga tallaala cuduuda.

Caafimaadka ubadkaaga sidatan ayuu tallaalka kaddib noqon karaa

Ilmaha badidooda way caafimaad qabaan tallaalka kaddib. Qaar kalena waxay muujiyaan daal, qandho ama jir-xannuun. Waa falcelin caadi ah, xaaladdas qofka is-tallaalay wuxuu u baahan yahay in maalintaas u nasto. Waxaa kaloo dhici karto in qofku u xannuun ka dareemo halka gacanta laga tallaalay. Waxyeelooyinka kale ee tallaalka caadi ma ahan. Laakiin haddii qofku usan caafimaadkiisa wanaagsanayn, oona iska dareemo calaamadaha cudurka kuwaasoo tallaalka kahor dareemin waxaa muhim ah in u daryeel caafimaadeed raadsado. Waxyeellada tallaalka oo aan aad caadi u ahayn ee tallaalka cudurka [Covid-19] looga hortago waxaa weeyaan caabuqa ku dhaca murqaha wadnaha. Xaaladdaas wuxuu qofku feeraha ka dareemi karaa xannuun iyo cillada neefsashada. Laakiin waxaa ka si caadiyeysan in qofku u ku dhaco caabuqa murqaha wadnaha infeekshanka fayruuska kaddib, sida tusaale haddii qofku u ku dhacay cudurka [Covid-19], haddii la barbardhigo kaddib markii cudurka [Covid-19] laga tallaalay. Haddii ubadkaaga usan caafimaadkiisa wanaagsanayn waxaad wici kartaa 1177 Vårdguiden talo-sin iyo hagid dartooda.

SU`AALLO MIYAA NA WAYDIIN LAHAYD?

Caadi ahaan qofku su`aallo ayuu qaba tallaalka kahor. Waxaa fiican in xubnaha qoyska ay ka hadlaan tallaalka oona wadajir ilmahooda warbixintaan aqristaan.

Warbixin dheeraad waxaa laga aqrisan karaa

- [1177.se](https://www.1177.se)
- [Folkhälsomyndigheten.se](https://www.folkhalsomyndigheten.se)

Barta internetka 1177.se waxaad ka aqrisan kartaa qodobada ka hirgaleen degmada aad dega tahay, iyo sida ubadkaaga u ku heli karo fursadda tallaalka.

Wac **08-123 680 00** haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ku qoran luqad aan ahayn af-iswiidish.

